# Kor u soo qaadista xaafadaha magaala nawaaxigeeda (Förortslyftet)

**Iswiidhan waa inay noqotaa wadan cid kastaa fursad ka hesho.** Markaas ayaynaan lahaan karin aagag/meelo ay nolol maalmeedka dadka iyo fursaddaha noloshu ay xaddidan tahay sida 60 ka meelood ee boolisku sheegay inay yihiin qaar khatar ugu jira. Sidaas darteed ayaa kor u soo qaadista xaafadaha magaala nawaaxigeeda loogu baahan yahay - qorshe lagu bedelaayo sida xun ee ay Iswiidhan wax u socdaan meelaha khatarta ugu jira. Waxay Liberalerna dalbanayaan inaanay Iswiidhan sanadka 2030 yeelan wax aag/deegaan khatar ugu jira ah.

Ma jiro hal waxqabad khaas ah oo lagu beddeli karro siday meelaha khatarta ugu jira wax u socdaan ee laakiin waxa ay u baahan tahay tallaabooyin badan oo kala duwan oo khusyeeya meelo kala duwan. Sida hoos timaada nidaamka kor u soo qaadista xaafadaha magaala nawaaxigeeda ayay Liberalerna soo bandhigayaan fikrado shan arimood/qeybood ah oo khuseeya, La dagaalanka dembiyada iyo xagjirnimada, Is-masruufida/is dabarida, Sinnaanta iyo aragtida Dimoquraadiyadda, Deegaanada guryaha oo ammaan ah iyo sidoo kale Dugsiyada iyo Waxbarashada.
Inta lagu jiro xilliga deyrta 2020, ayuu xisbiga Liberalerna soo bandhigi doona fikrado ku saabsan labada qeybood ee dambe

Halkan ayaad ka akhrisan kartaa qaar ka mid ah fikradaha. Waxaad fikradaha oo dhan ka akhrisan kartaa **liberalerna.se**

## Meelaha degaanka oo ka ammaan badan

**Shuruudo ka adag oo mulkiilayaasha guryaha la saaraayo**

Mulkiilayaasha guryahu waa inay masuul ka noqdaan inay booliska soo wargaliyaan marka dhismayaasha fal dembi ah loo adeegsado. Mulkiilayaasha guryahu waa inay mas'uul ka ahaadaan si aanay dhismayaashu ugu burburin. Waa inay jirto shuruud la saaraayo mulkiilayaasha guryaha si loogu qaado tallaabooyin ka hortagga dambiyada iyo dayactirka dhismayaasha ah. Waa inay ka fududaato in la dumiyo ama qasab lagula wareego guryaha dayacan. Kamuunadu waa inay awoodi karaan joojinta iibsiga guryaha marka cidda iibsaneysaa ay tahay qof horay guryaha u dayacay.

**Waa inay ka fududaato in la cayriyo kireystayaasha falal dembiyada sameeya**

Dadka faraha kula jira falalka dembiyada waa inaan loo oggolaan inay cabsi geliyaan dhammaan aaga degaanka. Sidaa darteed, waa inay ka cadahay in guriga laga ceyrin karo kireyste ahaan haddii aad waddo dembiyada qorsheysan, haddii aad haysato maan dooriye si aad u sii iibiso, haddii si sharci darro ah loogu haysato hub ama haddii aad qaabisho ama uu kula soo dego qof inuu goobta/meesha sii joogo laga mamnuucay.

**Iska kaashi abuurida meelaha ka aamaan badan**

Waxa aanu rabnaa sharci dejin cusub si loo abuuro heshiisyada isdhexgalka iyo Business Improvement Distric ama BID (Horumarinta Ganacsiga Degmada, waa hab lagu abaabulo loona sharciyeeyo isku xidhnaanta iyo iskaashiga u dhexeysa mulkiilayaasha guryaha ee kala duwan iyo daneeyayasha bulshada si kor logu qaado soo jiidashada deegaan la xushay iyada oo loo marayo tallaabooyin waxqabad oo la taaban karro, kor u qaadisata ganacsi iyo waxyaalaha kale ee soo jiidashada leh) taas oo micnaheedu yahay in daneeyayaal badan sida kamuunka, dowlada, mulkiileyaasha guryaha iyo daneeyayaasha kale oo maxalliga ah ay si wadajir ah ugu sameeyaan mashaariic kor loogu soo qaadayo deegaanada. Waxa aanu sidoo kale dooneynaa inaanu abuurno sanduuq qaran oo ka caawin kara maalgelinta maalgashiyada gacan ka geysan kara isbedelka muddada dheer ee deegaanka.

**Dhimista kala soocsanaanta dadka**

Ma fiicna markii dada badan oo bilaa shaqo ahi ay hal aag/meel ku wada noolaadaan. Marka qofka ku nool kaalmada caydhu uu u soo guuro kamuun waa in xafiiska adeegga bulshadu uu si cad uga shaqeeyaa sidii dadkaas loo dejin lahaa meelo aan ahayn meelaha khatarta ugu jira.

**Ka hor tagidda musuqmaasuqa ka dhanka ah diiwaanka dadweynaha**

Shaqada ka dhanka ah ka ganacsiga kontaraagyada suuqa madow waxay u baahan tahay in la xoojiyo. Waxa aanu dooneynaa inaan aragno shaqo ka wax ku oolsan oo ka dhan ah dembiyada diiwaangelinta dadweynaha iyo sameynta tirakoobka qaran, sababta oo qeyb ahaan ah in dadka go'aanka qaarayaa ay haystaan xogta dhabta ah iyo qeyb ahaan in la ogaado oo laga hortago dembiyada.

## Baahiyaha guryaha Iswiidhan oo loo qeybiyo hadba sida ku xidhan baahida

Dad badani waa inay helaan fursad ay guri ku helaaan. Waxa ay maanta u baahan tahay, awood bulsho ahaaneed iyo mid dhaqaal aahaaneed si loogu hello guri la kireysto ama ku la iibsado. Qaab deganaasho oo cusub, kaas oo lagu kala qeybiyo kooto bulshada ee xiriirinta kiraystayaasha kamuunka, ayaa hoos u dhigi laheyn xadka ugu hooseeya iyadoo dad badna siineysa fursad ay guri ku helaan. Waxa muhiim ah inaanay guryahaasi kaliya ka oolin hal meel oo kaliya ee ay ku dhex dhafan yihiin guryaha kale.

## Dad ka badan waa inay guryahooda lahaan karaan

**Kala bar dhammaan guryaha ku yaal meelaha khatarta ugu jira waa inay ka koobnaadaan guryo qaab lahaansho ah marka 2030 la gaaro**

Dadku waa inay yeeshaan xuquuqda ay iyagu ku go'aansanayaan haddii ay doorbidayaan inay ku noolaadaan guri kireysi ama guri qaab lahaansho ah. Meelaha khatarta ugu jira ayaa kiraysigu ku badan yahay, kaas oo sidoo kale ah qaabka deganaanshaha ee ugu qaalisan. Guryo badan oo kireysiga iyo kuwa xuquuqda lahaanshaha ayaa meelaha khatarta ugu jira looga baahan yahay in la beddelo oo dib loo dhiso si loogu kordhiyo fursadda kala doorashada oo la xoojiyo xaaladda dhaqaale ee dadka ku nool meelah akhatarta ugu jira.

**Amaahda bilowga ah oo dawladda laga qaato ee dadka guryaha iibsanaaya**

Dadka qaar si wanaagsan wax iskaga bixin karaaya ee raasamaal ku filan/wanaagsan oo ay sii dhigaan haysta ayaan haddana loo ogolaan deyn inay bangiga ka qaataan si ay ugu iibsadaan guriga ugu horreeya. Amaah bilow ah oo xadidan ayaa kabi kari laheyd amaahda bangiga ee iibsiga guriga ugu horreeya, si dad badan loogu siiyo fursadda ay ku iibsanayaan guri.

**Keydsiga guryaha oo canshuur dhaafka leh ee dadka guriga ugu horeeya iibsanaaya**

Waa inay faa'iido leedahay in wax la keysado 0o mas'uuliyadda la qaado. Marka dadka laga caawiyo inay iyagu is caawiyaan ayaa keydsiga guryaha ee canshuur dhaafka lehi uu faa'iidooyin bulsheed keeni karaa, iyadoo aan loo baahneyn inay dowladdu ku qasbanaato inay ku darto taageerto maaliyad ahaaneed ama kaalmo/kabid.

**In laga daayo shuruudaha hafto bixinta ee aadka u adag**

Shuruudda hafto bixinta ee adag waxay kor u qaadeysaa xadka ugu hooseeya ee suuqa guryaha waxayna keenaysaa inuu bangigu dad ka tiro yar amaah u oggolaado si ay u iibsadaan guri. Sidaa darteed ayaa loogu baahan yahay in laga daayo shuruudaha adag ee hafto bixinta si dad ka badan loogu oggolaado inay ku noolaadaan qaabka deganaanshaha ee ugu raqiisan mustaqbalka fog.

## Luqadda Iswidishka ee dugsiga

**In booska luqadda Iswidishka ee xanaanada la xoojiyo**

Haddii aan xilli hore af Iswiidhish wanaagsan la baran, ayay taasi saameynaysaa dhamaan inta ka hadhsan xilliga dugsiga lagu jiro. Waxaan rabnaa in shuruud ka adag oo aqoonta luqada Iswiidhishka ee macalimiinta xannaanada loo dhigo iyo in qasab laga dhigo xanaanada luqadu ee loogu talagalay carruurta dhowaan timid ee da'doodu u dhexeyso seddex ilaa shan sanno jir ee ka soo jeeda qoysaska leh luqad kale oo aan ahayn Iswidhishka. Waa inay dhammaan carruurtu helaan fursadda ay ku gaarayaan himilooyinkooda Iswiidhan iyadoo aan asalka ay ka soo jeedaan loo eegeynin.

**Daraasad u sameynt qaran ahaaneed oo ku saabsan erayada carruurta**

Si loo awoodo in la garto xanaanooyinka leh carruurta u baahan waxqabad kor loogu qaadaayo luqadooda iyo si loogu qiimeeyo nidaamyada iyo waxqabadyada barashada luqada ee hawlaha xanaanada ayay muhiimad weyn tahay in in meeshan/aagan ay ka jirto aqoon la heli karaa. In la cabbiro micnaheedu waxa weeye in la og yahay, iyo iyadoo sahamin buuxda la sameynaayo ayaynu heli karnaa aqoon ku saabsan halka ay tahay in waxqabad la galiyo.

## Ka hortagida kala soocsanaanta dugsiga

**Wax ka badan isku qasa kooxaha ardayda**
Waa in dhamaan dugsiyadu si cad uga shaqeeyaan isku dhafnaanta kooxaha ardayda oo ay kooto u qoondeeyaanardayda dhowaan wadanka timid.

**Macallimiinta ugu fiican waa inay ka shaqeeyaan dugsiyada khatarta ugu jira**
Waxay Liberalerna rabaan inay hirgeliyaan waxqabad loogaga soo hor jeedo kala soocsanaanta waxbarashada. Iyada loo soo maraayo bixinta mushaharooyin ka badan, waqtiga casharada ee barayaasha oo ka gaaban, helitaanka barayaasha gaarka ah, koonto tababarka oo shaqsi ahaaneed ee barayaashu leeyihiin iyo helitaanka waxqabadyada taageerada oo wanaagsan waa inay noqtaa mid soo jiidasho u leh macalimiinta la ansaxiyey iyo kuwa khibradda leh inay soo codsadaan dugsiyada meelaha khatarta ugu jira.

**In dowlada loo ogolaado inay bilawdo oo ay maamusho dugsiyada gaar ah oo ku yaal meelaha khatarta ugu jira**
Dugsiyada kamuunka ee ku yaala meelaha khatarta ugu jira ee muddo badan ku guul dareystey hawashoodii waa in ay dowladu la wareeegi kartaa oo ay u sii wadi kartaa iyagoo leh waxqabad aqooneed oo gaar ah.

**Baadhitaan ku sameeeya nidaamka lacagta waxbarashada**
Nidaamka lacagta waxbarashada waa in la baadhaa oo la sii horumaariyaa si kala qeybsiga dhaqaalaha sida ugu wanaagsan uu ugu dhigmo kharashaadka dugsiga oo uu isla markaan muddo kadib noqdo mid ka xasilan.

**Dib u habeyn lagu sameeyo barnaamijka introduktionsprogrammet ee dugsiga sare**
Fursadaha lagu soo bilaabaayo dugsi qaab cusub ah waa in baaritaan lagu sameeyaa oo laga fiirsadaa. Ardayda aan u qalmin waa inay helaan fursado ka badan oo ay ku doortaan waddooyin kala duwan iyada oo loo soo maraayo nidaamka dugsiga, tusaale ahaan dariiqooyinka gebi ahaanba qacanta wax ka qabashada ku tiirsan.

**Maamulka dugsigu waa inay go'aamiyaan xeerarka habraaca**
In meesha laga saaro shuruudaha looga baahan yahay wada go'aaminta ardayda ee ku saabsan xeerarka habraaca. Ardaydu waa inay ka qeybqaataan shaqada xeerarka nidaamka ee dugsiga, laakiin nooca xeerka shaqeynaaya waa in markasta uu maamulka dugsiga go'aamiyaa.

## Amniga iyo in meel degan wax lagu barto dugsiga dhexdiisa

**In la soo saaro jaranjarta natiijada iyo dhokumenti filashooyinka ee dhammaan dugsiyada**
Dhammaan dugsiyadu waa inay soo bandhigaan jaranjarooyinka cawaaqibta. Si la mid ah sida dhamaan dugsiyada ay maanta ugu leeyihiin xeerarka habraac, waa inay jiraan dhokumentiyo si cad ugu caddaynaaya cawaaqibka ay keeni karto ku tumashada xeerarku. Dhammaan dugsiyadu waa inay sidoo kale soo rogaan dhokumentiyada filashada ee ay tahay in mas'uulku uu saxeexo. Dhokumentigu waa inuu tusaale ahaan si cad ugu qeexaa sharciyada ka shaqeynaaya dugsiga.

**Bay'ada gudaha iyo tan dibaddaba ee dugsiyada waa in loo qorsheeyo iyadoo laga fikiraayo xaga amniga**
Dugsigu ma aha goob dadweyne, iyo si amaan

loogu abuuro, ay muhiim tahay in kaliya shaqaalaha ogolaanshaha u haysta iyo ardayda dugsigu ay soo gali karaan dhismayaasha iyo lookaalada dugsiga. Jawiga gudaha ee dhamaan iskuulada waa in laqorsheeyo loona qaabeeyo xaga amaanka iyo aragtida dumarka.

**La xoojiyo shaqada ka dhanka ah xoogsheegashada**
Waxaanu dooneynaa inaan Skolverket siino hawsha ah in si joogto ah loogu soo uruuriyo cadeymaha caalamiga ah ee la xiriira nidaamyada wax ku oolka ee ku saabsan sida loo abuuro amniga iyo in meel degan wax lagu barto iyo sidoo kale ka hortaga xoogsheegashada dugsiga ka dhex dhacda.

**Qofka wax jajabiyaa waa inuu isagu bixiyaa**
Ardayda jajabisa hantida dugsiga waa inay taas masuuliyadeedda qaadaan. Soo rogidda dalabka magdhowga ee ardayda dugsiga waxyeellooyinka u geysta.